**Su'aalaha Badanaa La Iska Weydiiyo (FAQ) Fasaxa Qoyska iyo ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato (PFML) ee Shaqaalaha**

**Fiiro gaar ah:** Su'aalahan Badanaa La Is Weydiiyo waxa loogu talagalay inay ka caawiyaan loo shaqeeyeyaasha iyo shaqaalaha inay si wanaagsan u fahmaan xuquuqdooda iyo masuuliyadahooda iyo inay dhex mushaaxaan Sharciga Fasaxa Qoyska iyo Ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato ee Maine. Dukumintigani waxa uu bixiyaa hagitaan balse ma beddelo awoodda Sharciga ama Xeerarka barnaamijka. Macluumaadka ku jira hagitaankan waa kuwo la beddeli karo. Booqo https://www.maine.gov/paidleave/ si aad u hesho macluumaadkii ugu dambeeyey.

**Su'aalo Guud:**

**1. Miyaa aan soo hoos galayaa sharcigan?**

Ku dhawaad qofkasta oo ka shaqeeya Maine waa mid soo hoos galaya sharcigan Fasaxa Qoyska iyo ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato.

**Waxa jira waxoogaa ka reebitaano ah:**

- Haddii aad shaqaale u tahay dawladda federaalka ah, ma soo hoos galaysid sharcigan.
- Haddii aad shaqaale u tahay dawlad qabiileed, ma soo hoos galaysid sharcigan iyada oo moojee dawlad qabiileedku ay dooratay inay ka qaybqaadato barnaamijka.
- Haddii aad xabsi ku jirto, ma soo hoos galaysid sharcigan.
- Haddii shaqada keliya ee aad ka hayso Maine ay tahay mid qayb ka ah barnaamij shaqo-waxbarasho, ma soo hoos galaysid sharcigan.
- Haddii aad tahay mid iskii-u-shaqaysta, waxa aad keliya soo hoos galaysaa sharcigan haddii aad dooratay inaad ka qaybqaadato.

Marka laga reebo ka reebitaanadaas, waxa aad u qalantaa inaad fasax mushaharka aad qaadato ka hesho shaqada sababo cayiman awgood, haddii aad buuxiso shuruudo dakhli oo cayiman.

**2. Goorma ayaa uu barnaamijku bilaabmayaa?**

Bixinta lacagaha caymisku waxa ay bilaabatay Janaayo 1, 2025, waxaana la qorsheeyay in gunnooyinku ay bilaabmaan Maajo 1, 2026.

**3. Waa maxay shardiga dakhliga ee lagu helayo gunnooyinku?**

Haddii aad kasbatay 6 jeer Celceliska Mushaharka Toddobaadlaha ah ee Gobolka (SAWW) inta lagu gudo jiro muddo wakhti ah oo la cayimay, waxa aad buuxinaysaa shardiga dakhliga ee barnaamijka. SAWW ga waxa shaacisa Waaxda Shaqaalaha ee Maine sanad walba, iyada oo ku

xisaabtamaysa xogta mushaharka ee guud ahaan gobolka. Muddada wakhtiga ah ee lagu kasbado 6 jeer SAWW waa Muddadaada Aasaasiga ah: afarta saddex-bilood ee ugu horreeya shantii saddex-bilood ee aad dhamaysatay ee u dambeeyey kahor inta aanu fasaxaagu bilaabmin.

**Tusaale ahaan:** haddii aad u baahato in fasaxa shaqada aad gasho laga bilaabo Ogosto 1, 2026, Muddadaada Aasaasiga ah waxa ay noqon doontaa Abriil 1, 2025 illaa Maarso 31, 2026. Haddii inta lagu gudo jiro wakhtigaas aad kasbatay ugu yaraan 6 jeer SAWW, markaas waxa laguu ansixin karaa gunnooyinka fasaxaas Ogosto 2026. 2024 kii, SAWW waxa uu ahaa $1,144, balse waa uu isbedelaa sanad walba, mana saadaalin karno waxa uu noqon doono sanadada mustaqbalka.

Loo shaqeeyahaaga (ama loo shaqeeyeyaashaaada, haddii aad u shaqayso wax ka badan hal shirkad) ayaa noo sheegi doona waxa uu dakhligaagu ahaa saddex-bilood kasta, si aanu taas u fayl gareyno. Waxa aanu ogaan doonaa inaad buuxisay shardiga dakhliga marka aad soo gudbiso sheegasho fasaxa mushaharka la qaato ah.

**4. Waa maxay sababaha aan fasax u qaadan karaa?**

PFML ka Maine waxa ay u bixisaa kharashka fasaxa sababahan awgood:

- **Fasax Caafimaad**: Wakhtiyada xaalad caafimaad oo halis ahi ay kaa hor istaagto inaad shaqayso.
- **Fasax Waalidnimo:** Wakhti aad ku xidhmayso ilme kadib dhalashada, masuul-korineed ama masuul-hayn ka noqoshada ilme.
- **Fasax Qoys:** Wakhti lagu daryeelayo qof qoys ah oo qaba xaalad caafimaad oo daran.
- **Fasax Qoys Milatari:** Wakhti loogu diyaargaroobayo shaqo-gelinta milatari ee xubin qoys ah.
- **Fasax Ammaan:** Wakhti lagu raadsanayo ammaan kadib xadgudub ama tacaddi.

**5. Fasax intee le'eg ayaa aan qaadan karaa?**

PFML ka Maine waxa ay bixisaa muddo ah illaa 12 toddobaad oo fasax ah Sanad Gunneedka. Sanad Gunneedku waa muddo 12-bilood ah oo bilaabma isla toddobaadka uu fasaxaagu bilaabmo.

**6. Miyaa wakhtigayga Fasaxa Qoyska iyo ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato ee Maine (PFML) la dhimi doonaa haddii aan qaato fasaxyo hoos yimaadda sharciyo kale?**

Haa. PFML ka Maine, Xeerka Fasaxa Qoyska iyo ka Caafimaadka ee federaalka (FMLA), iyo FMLA ga Maine waxa ay socon doonaan isku wakhti marka ay dhammaan dhaqan galaan. Loogu ma talagalin in loo adeegsado si kala gaar ah: haddii aad hoos timaaddo dhammaan saddexdaba, ma dooran kartid inaad qaadato 12 toddobaad oo ah FMLA ga federaalka kadibna aad qaadato 12 toddobaad oo kale oo PFML ka Maine ah. Fasax kasta oo aad qaadato oo hoos yimaadda FMLA ga federaalka ama FMLA ga Maine 12 ka bilood ee ka horreeya inta aanay bilaabmin gunnadaada PFML ka Maine waxa laga jari doonaa 12 ka toddobaad ee PFML ka Maine ee aad xaqa u leedahay.

**Tusaale ahaan:** Haddii aad qaadatay 4 toddobaad oo FMLA ga federaalka ama FMLA ga Maine ah Diisambar 2025, waxa aad keliya yeelan doontaa 8 toddobaad oo PFML ah oo aad heli karto 2026 ka marka ay gunnooyinkaagu bilaabmaan Maajo 2026 ka.

**7. Miyaan ku qasbanahay in aan dhammaan fasaxayga wada qaato halmar?**

Maya, kuma qasbanid inaad wada qaadato dhammaan fasaxaaga halmar.

- Haddii aad u baahato inaad qaadato fasaxa 12 ka toddobaad oo dhan, waa aad sameyn kartaa taas.
- Haddii aad u baahato inaad ka qaadato fasaxa laba toddobaad, waa aad sameyn kartaa taas, waxana kuu hadhi doona toban toddobaad oo aad adeegsan karto mardambe haddii aad u baahato.
- Waxana aad sidoo kale fasaxa u qaadan kartaa si goos-goos ah -- maalin ayaa aad qaadan kartaa muddadiiba, ama, mararka qaar, qayb kamid ah maailn -- haddii ay taasi tahay marka aad u baahato inaad fasaxa qaadato.

**8. Miyaa ay ii ilaashan tahay shaqadaydu inta aan ku jiro fasaxa?**

Waxa ay ku xidhan tahay xaalka shaqada. Shaqadaadu waa ay kuu ilaashanaan doontaa haddii aad u shaqaynaysay loo shaqeeyahaaga ugu yaraan 120 maalmood oo isku xiga marka aad fasaxa ka qaadanayso shaqada. Taasi waxa ay ka dhigan tahay marka fasaxaaga la ansixiyey uu dhammaado oo aad kusoo laabato shaqada, loo shaqeeyahaagu waxa uu kugu celin doonaa booskii aad haysay markii aad fasaxa ka qaadatay shaqada. Waxa uu kugu celin karaa boos kale balse keliya waa haddii ay la mushahar, gunnooyin, iyo la xaalado tahay booskaagii hore.

Haddii aad fasax mushaharka la qaato aad ka qaadatay shaqo aad shaqaale ka ahayd muddo ka yar 120 maalmood, loo shaqeeyahaagu waa hubaal in uu kugu celin karo booskii aad haysay, balse kuma qasbana.

Si kastaba ha ahaatee, loo shaqeeyahaaga looma ogola in uu aargoosi kuugu geysto fasax la ansixiyey oo aad qaadatay.

**9. Goorma ayaa ay tahay in aan ku wargeliyo loo shaqeeyahayga codsigayga ah inaan qaato fasaxa?**

Waa inaad siiso loo shaqeeyahaaga wargelin macquul ah haddii aad ogtahay inaad u baahan doonto inaad qaadato fasax:

- Tusaale ahaan, haddii aad garanayso inaad u baahan doonto qalliin muddaysan laba bilood kadib hadda, ugu yaraan 30 maalmood ayaa noqon doona wargelin macquul ah.
- Haddii aad hore u sii ogtahay in aad u baahan doonto fasax, balse aanad sii ogeyn muddadaas kahor, waa inaad u sheegto loo shaqeeyahaaga marka aad ogaato uun.
- Haddii aad fasax ugu baahato si degdeg ah, waa inaad ugu sheegto loo shaqeeyahaaga sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah.

Waxa aad ku haysaa maskaxda inay tahay inaad u sheegto loo shaqeeyahaaga isla markaana aad gudbiso sheegasho gunnooyinka ah. Hubi qaybta Jadwal-wakhtiyeedka Codsiga si aad u hesho macluumaad ku saabsan goorta ay tahay inaad gudbiso sheegashadaada.

**10. Miyaa qofkale bixin karaa wargelin fasax isaga oo iga wakiil ah aniga?**

Haa, haddii aanad awoodin inaad bixiso wargelin, qofkale ayaa taas kuu sameyn kara adiga. Tusaale ahaan, haddii aad fasax ugu baahato xaalad degdeg ah oo caafimaad awgeed, xubin qoys ama bixiye daryeel caafimaad ayaa bixin kara wargelin isaga oo kaa wakiil ah adiga.

**11. Miyaa ay helitaanka gunnooyinku leeyihiin muddo sugitaan marka la ansixiyo?**

Waxa ay ku xidhan tahay hadba xaalka jira. Waxa jirta muddo sugitaan oo ah 7 maalmood haddii fasaxa aad u qaadanayso xaaladdaada caafimaad awgeed. Haddii fasaxaaga caafimaad la ansixiyo, gunnooyinka lama bixin doono 7 da maalmood ee ugu horreeya ee ka bilaabma maalinta koowaad ee fasaxa. Haddii aad u qaadanayso fasaxa sabab kale, ma jirto muddo sugitaan.

Waxa aad keliya u baahan doontaa inaad dhamaystirto hal muddo sugitaan sanad gunneedkiiba (Sanad guneed waa muddo 12 bilood ah taas oo aad gudaheeda qaadan karto fasaxaaga 12 ka toddobaad ah, waxana uu bilaabmaa marka ugu horaysa ee aad qaadato fasax.) Tani waxa ay ka dhigan tahay in haddii aad qaadato fasax caafimaad oo 4 toddobaad ah, in toddobaadka ugu horreeyaa uu noqon doono bilaa mushahar 3 da toddobaad ee kalena ay noqon doonaan kuwo mushaharka la qaato. Haddii aad kadib qaadato fasax caafimaad oo 4 toddobaad ah oo kale kahor inta aanu dhammaan sanad gunneedku, dhammaan 4 taas toddobaad waa la bixin doonaa mushaharka. Haddii aad qaadato fasax caafimaad oo 4 toddobaad ah oo kale, kaba soo qaad, saddex sano kadib, toddobaadka koowaad waxa uu noqon doonaa mid aan la bixin mushaharka maadaama oo aad ku jiri doonto sanad gunneed cusub sidaas darteedna aad ku qasbanaan doontaa inaad dhamaystirto muddo sugitaan markale.

**12. Miyaa la dhimayaa gunnooyinkayga PFML haddii laga yaabo inaan lacago ka helo barnaamijyo kale?**

Waxa ay ku xidhan tahay xaalka shaqada.

Gunnooyinkaaga PFML calaa doolar ayaa lagaaga jari doonaa wixii lacago ah ee aad ka helayso isla wakhtigaas:

- Caymiska shaqo-la'aanta gobolka
- Magdhawga shaqaalaha, marka laga reebo gunnooyinka aad u qaadato awood-la'aanta qaybeed ee kaasoo gaadhay dhaawac kugu dhacay kahor sheegashada PFML ka
- Wixii barnaamij naafanimo muddo-gaaban ama muddo-dheer ah oo ay dawladdu bixiso (sida Caymiska Naafanimada Sooshal Sekuuritiga)
- Qorshe caymis naafanimo oo muddo-dheer oo aad ka hesho loo shaqeeyahaaga hadda ama mid hore

Marka aad xarayso sheegasho, Masuulka ayaa wax kaa weydiin doona lacagaha laga yaabo inaad ka hesho barnaamijyo kale si uu usoo saari karo lacago gunno oo sax ah. Maskaxda ku hay, haddii ay dhacdo inaad gunnooyin ka hesho mid kamid ah barnaamijyadan iyo PFML isla wakhti isla markaana aanad u sheegin Masuulkaaga, in lagaa fili doono inaad soo celiso xaddigii ay ahayd in laga jaro gunnooyinkaaga.

Gunnooyinkaaga PFML LOOMA dhimi doono kuwa soo socda:

- Qorshaha caymiska naafanimada muddada-gaaban ee loo shaqeeyahaaga
- Sii waditaanka mushaharka "salary continuation" ee loo shaqeeyahaagu doorto in uu ku siiyo si uu u xidho gaabka u dhexeeya xaddiga dheefahaaga iyo xaddiga aad caadi ahaan kasbato (Ogsoonow in haddii aad sii waditaanka mushaharka dhamayska tiran ku bixinayso xaddiga mushaharka joogtada ah ee shaqaahaha, gunnooyinka PFML aanay bilaabmi doonin illaa sii waditaanka mushaharka dhamayska tiran uu dhammaado.)
- Mushaharka ku salaysan adeegsigaaga PTO ga si loo xidho gaabka u dhexeeya xaddiga gunnooyinkaaga iyo xaddiga aad caadi ahaan kasbato
- Gunnooyinka magdhawga shaqaalaha ee aad u qaadato awood-la'aanta qaybeed ee kaasoo gaadhay dhaawac kugu dhacay kahor sheegashada PFML ka.

**13. Ma adeegsan karaa fasaxayga mushaharka la qaato (PTO) ee iigu ururay loo shaqeeyahayga aniga oo ku jira PFML?**

Loo shaqeeyahaagu kugu ma qasbi karo inaad adeegsato PTO gaaga adiga oo ku jira PFML haddii aanad dooneyn inaad qaadato. Si walba ha noqotee, gunnooyinka PFML ma aha beddel mushahar oo dhamaystiran, sidaas darteed shaqaaluhu badanaa waxa ay doortaan inay adeegsadaan waxoogaa PTO ah si ay u xidhaan gaabka u dhexeeya xaddiga gunnadooda iyo mushaharkoodii caadiga ahaa. Adeegsiga waxoogaa PTO ah inta aad ku gudo jirto fasaxaagu waxa ay sidoo kale noqon kartaa qaab loo sahli karo ka jaritaanada mushaharka waxyaabaha sida kharashyada caymiska caafimaadka si loo sii wado inta aad ku gudo jirto fasaxaaga. Waa inaad kala tashato loo shaqeeyahaaga si aad u aragto siyaasadaha uga yaalla arrintan.

**14. Waxa aan dhalay ilme 2025. Miyaa aan u qalmaa inaan PFML qaato 2026 ka?**

Waa suuragal. Waxa suuragal ah in aanad awoodin inaad qaadato fasax caafimaad maadaama oo kasoo kabashadaada umushu ay kahor dhammaan doonto. Waxa aad awoodi kartaa inaad qaadato fasax qoys si aad xidhiidh ula sameyso oo aad ugu xidhanto ilmahaaga, illaa inta dhalashada ilmaha aanay kasoo wareegin wax ka badan hal sano. Waxa aad ku haysaa maskaxda, sidoo kale, in haddii aad qaadatay fasax aan mushaharka la qaadan oo hoos yimaadda FMLA ga federaalka ama FMLA ga Maine sanadka ka horreeya codsigaaga fasaxa, fasaxaasi waxa uu dhimi karaa wakhtiga PFML ka Maine ee aad xaqa u leedahay.

**Hannaanka & Jadwal-wakhtiyeedka Codsiga**

**15. Waa maxay dukumintiyada loo baahan yahay marka la codsanayo PFML ka?**

- Caddeynta aqoonsiga
- Macluumaadka aqoonsiga loo shaqeeyaha
- Sababta fasaxa
- Caddeynta aqoonsiga ee xubnaha qoyska, haddii fasaxa loo qaadanayo in la daryeelo xubin qoys oo la il daran xaalad caafimaad oo halis ah
- Jadwalka fasaxa ee lasoo jeediyey

Marka aad bilawdo sheegashadaada, waxa aanu kuu sheegi doonaa macluumaadka dheeraadka ah ee loo baahan yahay, sida xaqiijinta dhakhtarkaaga haddii aad qaadanayso fasax caafimaad, iyo wakhtiga kama dambeysta ah ee aad soo dirayso.

**16. Waa maxay dukumintiyada ay tahay in aan bixiyo haddii aan u codsanayo PFML ka si aan u daryeelo xubin qoys?**

Waa inaad bixiso caddeyn ah aqoonsiga xubinta qoys, iyo sidoo kale dukuminti ka socda bixiyaha daryeelka caafimaadka kaas oo xaqiijinaya xaaladda caafimaad ee halista ah ee u baahan daryeelka. Haddii shakhsiga aad daryeelaysaa uu yahay qof aydaan sharci ahaan qaraabo ahayn balse aad xidhiidh shakhsiyeed oo weyn leedihiin, waxa aad u baahan kartaa inaad bixiso macluumaad dheeraad ah oo aad ku muujinayso xidhiidhkaas.

**17. Miyaa la ii diidi karaa gunnooyinka haddii aan gudbin waayo dhammaan dukumintiyada loo baahan yahay?**

Haddii aad soo gudbin weydo macluumaadka loo baahan yahay ee aad ku taageerayso sheegashadaada wakhtiga munaasabka ah, waxa laga yaabaa in muddadu kugu dheeraato. Si kastaba ha ahaatee, gunnooyinka dib ayaa loo dhigi karaa haddii aad soo gudbin weydo dukumintiyadaada taageerada wakhtiga munaasabka ah. Haddii aad soo gudbin weydo macluumaadka loo baahan yahay, waxa aanu ku qasbanaan karnaa in aanu diidno codsigaaga.

**18. Goorma ayaa aan soo gudbin karaa codsigayga PFML ka?**

Waxa aad soo gudbin kartaa codsigaaga illaa 60 maalmood kahor bilawga fasaxaaga, haddii aad ogtahay inaad u baahan tahay fasaxa muddadaas kahor.

- Wakhtiga u dambeeya ee aad soo gudbin karto codsigaagu waa 90 maalmood kadib bilawga fasaxaaga.
- Haddii aad seegto wakhtigaas kama dambeysta ah ee ah 90-maalmood, isla markaana aad u malaynayso inaad soo bandhigi karto sababta macquulka ah ee kugu qasabtay inaad xilli dambe soo codsato, noo soo sheeg waxana aanu dib u eegi doonaa xaaladdaada.
- Ha illaabin inaad sidoo kale masuul ka tahay inaad kala hadasho loo shaqeeyahaaga goorta aad u baahan doonto fasaxa. Inaad ogaysiiso 30 maalmood kahor ayaa ah macquul inta ugu badan xaaladaha, ama isla marka aad ogaato, haddii aad u baahato fasax lama filaan ah.

Waxa aanu ogaysiin doonaa loo shaqeeyahaaga inaad soo gudbisay codsi fasax dhawr maalin shaqeed gudahood. Waxa aad ku haysaa maskaxda in gunnooyinku aanay bilaabmi doonin illaa Maajo 1, 2026.

**19. Goorma ayaa aan heli doonaa lacagahayga gunnada?**

Barnaamijka PFML ku ma bixin doono wax gunnooyin ah illaa aanu dib u eegno dhammaan macluumaadka loo baahan yahay si loo taageero sheegashadaada. Haddii aanu ansixin karno sheegashadaada, waxa aanu bixin doonaa gunnooyinkaaga, anaga oo si toos ah usoo shubi doona ama ku bixin doona kaadhka deynta "debit card", sida ugu dhakhsaha badan kadib marka aanu gaadhno go'aamintaas.

<u>**Dhibaato Laxaad Leh:**</u>

**20. Ka waran haddii loo shaqeeyahaygu uu walaacyo ka keeno baahida aan u qabo inaan fasax qaato?**

Xaaladaha qaar, loo shaqeeyahaagu waxa laga yaabaa in uu yidhaa in qaadashada fasaxaaga marka aad codsatay ay dhibaato laxaad leh keeni doonto iyada oo carqaladeyn doonta hawlgalladiisa. Waxa ay soo gudbin doonaan tan 10 maalin shaqeed gudahood oo ka bilaabma marka aad soo gudbisay codsigaaga.

Haddii ay taasi dhacdo, waxa aanu dib u eegi doonaa dukumintiyada loo shaqeeyahaaga ee ku saabsan saameynta fasaxaagu ku yeelanayo ganacsigiisa, iyo waxa uu soo jeedinayo si loo sameeyo jadwal fasax oo ka carqaladeyn yar kaas hore. Anaga oo ku salaynayna macluumaadkaas, waxa aanu go'aamin doonaa in fasaxaaga loo baahan yahay in dib loo muddeeyo iyo inkale. Sidaas darteed, fasaxaaga waxa laga yaabaa in loo ansixiyo wakhti ka duwan ka aad markii hore codsatay.

**21. Haddii jadwalka fasaxayga la beddelo, racfaan ma ka qaadan karaa go'aankaas?**
Haa, adiga iyo loo shaqeeyahaaga labadiinuba racfaan baad qaadan kartaan haddii jadwalka fasaxaaga loo beddelo go'aamin dhibaato laxaad leh awgeed. Racfaannada waa in lasoo gudbiyo 15 maalin shaqeed gudahood oo ka bilaabma wargelinta.

**22. Maxaa dhacaya haddii loo shaqeeyahayga iyo anigu aanu isla qaadano in muddaynta fasaxaygu aanay keeni doonin dhibaato laxaad leh?**

Haddii fasaxaaga aad codsatay aanu u carqaladeyn doonin loo shaqeeyahaaga si aad u weyn oo uu u malayn karo in uu ku keeni doono dhibaato laxaad leh, waxa uu awoodi doonaa in uu saxeexo tanaasul uu ku sheegayo in sheegashadaada la fulin karo isaga oo aan sugin 10 ka maalin ganacsiyeed ee uu haddii kale sugi lahaa si uu u gudbiyo walaac.

**Lacagaha Caymiska:**

**23. Miyaa Lacagaha Caymiska ee PFML la cashuuraa?**

Su'aasha ah in kharashyada caymiska ee PFML la cashuuri karo waxa ay ku xidhan tahay hagitaanka iyo hannaanada Adeegga Dakhliga Gudaha ee Federaalka "Federal Internal Revenue Service". IRS waxa ay baahisay hagitaan rasmi ah oo ku saabsan arrimaha cashuuridda taas oo laga eegi karo halkan: RR-25-04.

**24. Sidee baa aan ku ogaan doonaa haddii loo shaqeeyahaygu uu ka jarayo lacagaha caymiska ee PFML mushaharkayga, ama haddii xaddiga ka jaritaanku uu isbeddelo?**

Loo shaqeeyahaagu waa in uu macluumaadka ku saabsan ka jaritaanka lacagaha caymiska ee PFML ka ku daro bayaanka mushaharkaaga. Haddii uu beddelo xaddiga lacagta caymiska ee uu ka jarayo mushaharkaaga, waa in uu ku siiyo wargelin qoraal ah ugu yaraan toddoba maalmood kahor mushaharka ugu horreeya ee uu ka jarayo. Xusuusnow, in aanu ka jari karin wax ka badan badh boqolkiiba kamid ah mushaharkaaga la xisaabiyo. Waxa uu dooran karaa in uu ka jaro wax ka yar badh boqolkiiba mushaharkaaga la xisaabiyo haddii uu doorto haddii uu doorto in uu kaa bixiyo dhammaan ama qayb kamid ah lacagtaada caymiska, tanina waa waxa uu beddeli karo haddii uu hore kuu sii siiyo wargelin qoraal ah.

**25. Waxa aan u malaynayaa in wax ka khaldan yihiin qaabka uu loo shaqeeyahaygu u maamulay lacagaha caymiska. Maxay tahay in aan sameeyo**?

Haddii aad u malayso in lacag aad u badan lagaa jaray, waxa aad awoodi kartaa in aad dib usoo ceshato wixii lacago caymis ah ee si dheeraad ah lagaaga jaray. Haddii ay jirto sabab aad ugu malaynayso in loo shaqeeyahaagu aanu siinayn lacagaha caymiska ah ee loo baahan yahay barnaamijka isaga oo kaa wakiil ah adiga, taasi waxa ay kugu sii adkeyn kartaa inaad hesho fasax mushaharka aad qaadato mustaqbalka haddii aad u baahato. Si walba ha noqotee, waxa aanu doonaynaa in aanu ogaano -- naga la soo xidhiidh lambarka (207) 621-5024.

**Gunnooyinka:**

**26. Miyaa gunnooyinka PFML ka Maine yihiin kuwo la cashuuri karo?**

Fadlan ogow: Diisambar 19, 2025, IRS waxay soosaartay kordhin muddada ee ku aaddan shuruudaha cashuurta dheefta PFML markay la xiriirto daawaynta gunnooyinka fasaxa caafimaadka mushahar ahaan: Kordhinta Muddada Kala-guurka si looga dhigo Sanadka 2026 marka la eego Shuruudaha Qaar ee Xukunka Dakhliga 2025-4. Sanad cashuureedka 2026, Maine PFML waxay uga warbixin doontaa qaybta cashuurtu ku waajibtay ee gunnooyinka fasaxa caafimaadka *dakhli* ahaan waxayna siin Foomka 1099-G qofka shaqaalaha ah. Shaqaaluhu wuxuu ikhtiyaar u leeyahay inuu iska haysto cashuuraha dkahliga ee gobolka iyo fadaraalka, laakiin gunnooyinka PFML waajib ku noqon maayaan cashuuraha mushaharka ee Sooshiyaal Sikuuritiga iyo Medicare inta lagu jiro 2026. Laga bilaabo sanad cashuureedka 2027, qaybta cashuurtu ku waajibtay gunnooyinka fasaxa caafimaadka waxa loola dhaqmi doonaa *mushahar* ahaan looguna tabiyo Foomka W-2 shaqaalaha sida ku xusan sare. Qaybta cashuurtu ku waajibtay ee dheefaha PFML

ee ku aaddan fasaxa caafimaad waxa fuuli doona cashuuraha mushaharka marka la eego Soosh-iyaal Sekuuriti iyo Medicare marka la gaaro 2027 iyo wixii ka dambeeya. Tilmaamaheenii hore ee ku saabsanaa sida loola dhaqmayo dheefaha PFML kahor kordhintan waxa laga heli karaa hoos:

Mararka qaar dheefaha Maine PFML cashuur ayaa ku waajibtay, mararka qaarna kuma waajibin. Adeegga Dakhliga Gudaha (IRS) waa halka ugu fiican ee laga heli karo macluumaadka su'aalaha cashuuraha. Waxay soosaareen oo baahiyeen tilmaamo rasmi ah oo ku saabsan su'aashan. Kaas halkan ayaad ka arki kartaa: IRS Revised Rule 2025-4. Jadwalka 2 ee bogga 30 waxa uu bixiyaa soo koobid wanaagsan, oo ay la socdaan macluumaadka hoose.

Dheefaha loo bixiyo sheegashooyinka **fasaxa qoyska ahaan** waxa loo tixgaliyaa *dakhliga la cashuuri karo*, laakiin looma tixgeliyo inay yihiin *mushahar.* Sidani waxay la mid tahay sida dheefaha shaqo la'aanta loola dhaqmo. Waxaad dooran kartaa inaad ka haysato dheefahaaga marka la eego cashuuraha dakhliga ee gobolka iyo fadaraalka. Waxaad heli doontaa Foom 1099-G dhammaadka sanadka weliba markaad gudbiso cashuur celintaada dakhliga.

Gunnooyinka loo bixiyo **fasaxa caafimaadka** waxa loo maareeyaa si ka duwan iyada oo ku xiran cidda ay waajibka ku tahay inay bixiso kharash bixinada caymiska: shaqaalaha ama loo shaqeeyaha.

- Marka uu shaqaaluhu bixiyo dhammaan kharash bixinada caymiska, gunnooyinkiisa fasaxa caafimaad ma aha kuwo la cashuuri karo haba yaraatee. Maine, loo shaqeeyeyaasha ay u shaqeeyaan wax ka yar 15 shaqaale waa laga cafiyaa qaybtooda kharash bixinta caymiska, sidaas darteed shaqaalaha ayaa bixiya dhammaan kharash bixinta caymiska.
- Marka shaqaaluhu bixiyo keliya qayb kamid ah kharash bixinada caymiska, markaas keliya qaybta gunnooyinka ee waafaqsan kharash bixintooda caymiska ayaa laga cafiyaa cashuurta. Qaybta loo tiirinayo kharash bixinta caymiska ee loo-shaqeeyaha ayaa noqon doonta *mushahar la cashuuri karo*.
- Xattaa haddii loo shaqeeyuhu si isxilqaan ah u bixiyo saamiga kharash bixinta caymiska ee shaqaalaha, xeerarka cashuuritaanku weli waa sidii sida lagu qiyaasay sharciga ee qaybinta kharashka.

Guud ahaan, tani waxay ka dhignaan doontaa haddii aad fasax ka qaadato loo-shaqeeye haysta 15 shaqaale ah (halkaasi oo sharcigu uu ka soo qaadayo dhammaan lacagaha khidmadda inay shaqaaluhu bixiyaan), wax ka mid ah gunnooyinkaaga caafimaadka fasaxa ee cashuurtu ku waajibtay lama cashuuri karo. Haddaad fasax ka qaadato loo-shaqeeye haysta 15 shaqaale ah ama ka badan (halkaasi oo sharcigu ka soo qaadayo in kala-bar lacagaha khidmadda ay shaqaaluhu bixiyaan, nuska kalena uu loo-shaqeeyuhu bixiyo), kala-bar gunnooyinkaaga fasaxa caafimaadka waxa loo cashuuri doonaa mushahar ahaan. Cashuuraha mushaharka ee Sooshal Sekuuritiga iyo Medicare ayaa laga jari doonaa qaybta la cashuuri karo ee gunnooyinka fasaxa caafimaad. Waxa aad sidoo kale dooran kartaa in aad si isxilqaan ah uga jarto cashuuraha dakhliga gobolka iyo kuwa federaalka. Waxa aad heli doontaa Foomka W-2 ee qaybta la cashuuri karo marka aad xaraynayso cashuur celinta dakhligaaga.